# Su'aallaha badanaa la isweydiiyo
# Somali | Soomaali

Sabteembar 2023

**OFFICIAL**

## Su'aallaha badanaa la isweydiiyo

- Si aad su'aalahan ugu akhrido luqadaada, booqo: XXXXXXXXX
- Si aad taleefanka ugula hadasho kooxdayada, ama aad u hesho turjubaan, fadlan wac 1800 716 866.

**Waa maxay mashruucani?**

Waa waqtigii aan qaadi lahayn talaabada weyn ee xigta si aan howlgab uga dhigno oo aan u beddelno ku dhawaad 44 daaro dhaadheer oo waaweyn oo la dhisay 1960-meeyadii iyo 1970-meeyadii, oo ku kala yaalla 21 goobood oo Melbourne ah.

**Maxaa howlgab looga dhigayaa guryaha dhaadheer?**

Dhamaan dadka Victoria waxay mudan yihiin meel ammaan ah, oo nabdoon, oo qiimahoodana la awoodi karo looguna yeero hoy.

Waxaan rabnaa inaan bixino guryo badan oo casri ah, raaxo leh, koronto badan aanan isticmaalin, iyo guryo la heli karo oo ku habboon ujeedada isla markaasna taageera bulshadeena si ay u kobcaan oo ay u koraan.

**Kaalma noocee ah ayay heli karaan dadka guryaha ijaartaa?**

Waxaan taageeri doonaa kireystayaashayada iyo bulshadayada tallaabo kasta oo jidka ah.

Kooxdayada heeganka ah ayaa hubin doona in dhammaan dadka deegaanka la siiyo macluumaad iyo taageero (ay ku jiraan macluumaadka luqadda) bilaha iyo sanadaha soo socda.

Haddii aad qabto su'aallo, waxaad soo:

| | |
|---|---|
| **Wici kartaa** | 1800 716 866, iyadoo turjubaanna laguu heli karo |
| **Iimaylka** | enquiries@homes.vic.gov.au |
| **Ka soo qayb gal** | Waqtiyada iyo taariikhaha macluumaadka bulshada ee la iska imaan karo balan la'aan ee goob kasta waxay ku dhaganaan doonaan boorarka lagu dhajiyay dhismaha guryaha. |
| **Fasiraada** | Ku hel fasiraada su'aalahan luqadaada - www.homes.vic.gov.au |

**Maxay tani adiga kaaga dhigan tahay?**

Ma jiro wax isbedelaya habeenki. Dadka guryaheena degan uma baahna inay dhaqsi guuraan. In howlgab laga dhigo guryaheena gaboobey ee dhaadheer waxay qaadan doontaa waqti. Waxaan hubin doonaa in dadka deegaanka ay sii helaan meel ay ugu yeeri karaan hoy marxalad kasta oo jirta.

Kooxdayada heeganka ah ayaa albaabada dadka degan goobaha garaaci doona waxayna goobaha ay ku yaalaan saraha dhaadheer kuugu keeni doonaan macluumaadka bulshada maalmaha iyo toddobaadyada soo socda. Kooxdani waxay la shaqayn doontaa shakhsiyaadka guryaha degan talaaba kasta oo la qaadayo.

**Ma dhegaysanaysaan baahiyaha iyo aragtida dadka guryaha kireysta?**

Haa. Dadka guyaheena degan iyo bulshadeena waa mudnaantayada ugu muhiimsan inta uu socdo mashruucakani.

Talaabadeena ugu horraysa waa in la xaqiijiyo in dhammaan dadka deegaanka ay haystaan xog wanaagsan ayna fahamsan yihiin taageerada ay heli karaan. Kooxdayada guriyaynta ayaa soo ururin doonta ra'yiga dadka deegaanka maalmaha, toddobaadyada, iyo bilaha soo socda.

Aragti dhiibashadaan ka timid dadka deegaanka iyo bulshooyinka maxaliga ah waxay gacan ka geysan doontaa qaabaynta qorshayaasha goob kasta. Waxaanu qof walba arimaha ula socod siin doonaa si joogto ah iyo fursadaha ra'yi dhiibashada, heer walba oo mashruuca.

**Maxaa loogu baahan yahay in dabaqyadii hore ee dhaadheerka hawlgab looga dhigo?**

Waxaa jirta sababa badan oo aan u doonayno in aan hawlgab uga dhigno guryahaan duqoobey. Guryaha dhaadheeri waxay soo gaareen dhamaadka waxqabadkooda, mana buuxiyaan hadda mustawayaasha ku noolaanshaha. Sanadihii la soo dhaafay cilladaha dhismooyinka iyo burburka (korontada, tuubooyinka, wiishashka) ayaa noqday kuwo aad u badan oo ku sababay khalkhal joogto ah dadka deegaanka.

Naqshadeynta dhismayaashu waxay sidoo kale ka dhigan tahay inaysan suurtagal ahayn in kor loogu qaado heerka loogu noolaan karo. Dhismayaashu waxay leeyihiin dahaarka kulaylka oo aad u xaddidan, iyo hawo iyo iftiin aad u xaddidan (dariishado yaryar oo aan meel fog ka furmin), taas oo ka dhigta kulayl xagaaga iyo qabowga jiilaalka, oo aan ku filnayn kulaylka iyo qaboojinta. Sidoo kale dadka qaba baahiyaha jireed ee kala duwan ma geli karaan.

**Goorma ayuu mashruucani bilaaban doonaa uuna dhammaan doonaa?**

In kasta oo mashruuca la bilaabayo hadda, waxay qaadan doontaa waqti dheer in howlgab laga dhigo oo la beddelo dhammaan dabaqyada dhaadheer. Dadka guryaha degan si joogto ah ayaan xogta ula wadaagi doonaa marka dabaqyadooda loo aqoonsado kuwa howlgabka laga dhigayo oo la badali doono.

**Goorma ayay tahay in kireystayaashu ay guuraan?**

Dadka kirada ugu jira loogama baahna inay isla markiiba guuraan.

Mashruuca waxa loo maarayn doonaa si tartiib-tartiib ah iyo hab dhaqan ku haboon oo xasaasi u ah dhamaan kiraystayaasha – oo ay ku jiraan Aboriginal-ka Victoria, kiraystayaasha da'da weyn, dadka naafada ah, iyo kiraystayaasha ka soo jeeda asal dhaqameed iyo luuqado kala duwan.

Goobaha qaarkood, waxaan wada hadal la bilaabi doonaa qaar ka mid ah dadka kirada ugu jira si aan u fahanno baahiyahooda iyo dookhooda.

Taas bedelkeeda, qaar ka mid ah dadka hada kirada ugu jira ayaa laga yaabaa inay hore usoo gudbisteen arji ah in guryaha loo badalo. Kooxdayada heeganka ah ayaa si dhow ula shaqayn doonta qoysaskaas si ay u xaqiijiyaan baahiyahooda iyo xulashooyinkooda.

**Maxaa dhacaya haddii qof kiro ugu jira uu doonayo hadda inuu ka guuro?**

Dadka deegaanka qaarkood ayaa laga yaabaa inay horeba usoo gudbiyeen codsiyada in guryaha loo badalo. Haddii ay jiraan guryo dadweynaha oo markaas bannaan, oo ayna ku habboon yihiin baahiyaha dadka deegaanka - waxaanu ku taageeri doonaa dadka deegaanka in guryahaas loo wareejiyo.

**Waa maxay waxyaabaha lagu tixgeliyo in qofka loo raadiyo meel cusub?**

Kooxdayada heeganka ah iyo kuwa khibradda leh ayaa la hadli doona kiraystayaasha gaarka ah si ay u fahmaan baahidooda. Tan waxa ku jiri kara inta qol ee jiifka ah ee ay u baahan karaan haddii ay carruur u dhigtaan iskuulada ku yaal xaafadaha dhow, haddii ay u baahan yihiin in ay ka ag dhowaadaan shaqada, haddii ay ku tiirsan yihiin gaadiidka dadweynaha, haddii ay haystaan xayawaan rabaayad ah oo loo baahan yahay in loo tixgaliyo, ama haddii ay u baahan yihiin inay helaan caafimaad ama taageerada adeegyada. Dhammaan arrimahan waxay muujinayaan ikhtiyaarrada la siinayo kireystayaasha.

### Dib-u-dejinta kiraystaha saamayn ma ku yeelan doontaa liiska sugitaanka Diiwaanka Guriyeynta Victoria (Victorian Housing Register - VHR)?

Dejinta kiraystaha waxaa loo maarayn doonaa tillaabo taxadar leh iyo heerar, si loo xaddido saamaynta ay ku leedahay Diiwaanka Guriyeynta Victoria.

Homes Victoria waxay ku socotaa waddadii ay ku gaarsiin lahaayeen 12,000 oo guri oo cusub 2026, waxaanan filaynaa inaan sawirno qaar ka mid ah guryahan cusub, iyo sidoo kale kuwa kale ee guud ahaan faylalkayaga, si loo raro kireystayaasha.

### Sidee dib-u-dejintu u saamaynaysaa qabanqaabada kiraynta?

Ma jiri doono wax isbeddel ah oo ku imaan doono xuquuqaha kireystaha ama goobaha kiraynta ee dadka degan guryaheena inta lagu jiro xilliga guuritaanka iyo dhismaha.

### Sidee Homes Victoria u maamuli doontaa habka dib u dejinta?

Waxaa naga go'an inaan la shaqeyno kireystayaasha si aan u gaarsiinno natiijooyinka ugu fiican.

Kooxdayada hawlkarka ahi waxay:

- bixin doonaan ogeysiis iyo macluumaad ku filan (oo ay ku jiraan macluumaadka luqada) marka ay timaado wakhtiga la bilaabayo ka fikirida doorashooyinka guryaha.
- la kulmi doonaan dadka guryaha kirada ugu jira si ay u dhageystaan una fahmaan baahiyahooda dhanka guryaha ah iyo xaaladahooda
- siin doonaan dadka guryaha kirada ugu jira macluumaad, taageero iyo xulashooyin kala duwan oo dib u-dejin ah
- xaqiijin doonaan xalalka in lagu daro kala duwanaanshaha kireystayaasha iyo dhaqanka waxayna tixgeliyaan siyaasadaha muhiimka ah sida Axdiga Xuquuqul Insaanka.